

Xalaaleynta wiilasha - Macluumaadka loogu tallo galay waalidka

Xeerka Swiidhan ee Xalaaleynta Wiilasha Marka aan arin Caafimaad Darteed loo Sameyn taas

Xeerka (2001:499) waxa uu sheegayaan in xalaaleynta wiilsha kaliya uu sameyn karro qof ogolaansho ka haysta Guddiga Qaranka Swedish ee Caafimaadka iyo Daryeelka (Socialstyrelsen). Cida kale ee wax xalaaleysa waxay gali karaan fal danbi oo ciqaab leh.

Ka hor inta aan la xalaaleyn, waa inuu dhakhtarku waalidka siiyo macluumaad waxa uu qaliinku yahay ah. Haddii uu wiilku haysto laba waalid, waa inay labaduba ogolaadaan in la xalaaleeyo.

Dhakhtarku waa inuu sidoo kale hubiyaa wiilka aragtidiisa iyo dalabkiisa haddii uu wiilku da' yahay uu ku sheegi karro. Wiilka laga ma yaabo in la xalaaleeyo haddii uu dalbanaayo inaan taas loo sameyn. Wuxaanu soo jeedinaynaa in dib loo dhigo qaliinka markaa ilaa ilmahu uu gaadhaayo da' weyn oo uu ku sameyn karro go'aankiisa.

Ilmaha waa in la siiyo xanuun jabiye. Xaaladu waa inay ahaato mid nadiifa ah sida la mid ah sida qaliimada kale, iyadoo sharci la mid ah uu shaqeyn doono.

Gobolka Kronoberg

Gobolka Kronoberg waxay go'aansatey in adeega caafimaadka bulshada aanu sameyn doonin xalaaleynta wiilasha sida ku lug leh dhaqanka ama diinta darteed. Sida ku dhigan Xeerka Bukaan-socodak Swiidhan, waxaad xor u tahay inaad ka raadsato daryeel bixiye kale. Macluumaadka taas ku sabsan (oo Ingriisi iyo Swiidhish ah) waxaad ka helaysaa khadka macluumaadka caafimaadka (Vårdlots): tel.: 0470 - 58 70 70.